**DOWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**
**XAFIISKA**
**GARYAQAANKA GUUD**

**ولاية بونت لاند**
**الصومالية**
**مكتب**
**المحامي العام للدولة**

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

| SANADKA 21AAD | CADADKA 12AAD | TAARIIKH: 30/12/21 | Lam. 08 |
|---|---|---|---|

**FAAFINTA RASMIGA AH**

**OFFICIAL GAZETTE**

الجريدة الرسمية

# SHARCIGA DALXIISKA PUNTLAND

| TUSMADA | |
|---|---|
| **Qeybta 1aad** | *Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah*<br>**Sharciga Dalxiiska Puntland** |
| **Qeybta 2aad** | *Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.*<br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 3aad** | *Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.*<br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 4aad** | Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.<br>WAXBA MALEH |
| **Qeybta 5aad** | Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.<br>WAXBA MALEH |

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA
MADAXWEYNAHA

ولاية بونت لاند
الصومالية

مكتب
الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Sharci Lr.8 ee December 29, 2021, kuna saabsan Sharciga Dalxiiska Puntland**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80aad farqadiisa 16-aad

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/84/2021, kuna taariikhaysan December 26, 2021.

**Markuu tixgeliyey:** Baahidda loo qabo in la sameeyo xeer lagu maamulo Adeegga Dalxiiska Puntland

**Wuxuu soo saaray**

Sharciga soo socda:

**Qodobka 1aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen **Xeerka Dalxiiska Puntland**

**Qodobka 2aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda

**Qodobka 3aad**

Dhaqangal, Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland

**Siciid Cabdullaahi Deni**
Madaxweynaha Dawladda Puntland

Office of the President
Puntland State of Somalia

**Tix:-XGGW/DPL/84/2021** **Garoowe, Axad,** **Taariikh: - 26/12/2021**

**Ku: - Madaxweynaha DPL**
**Garoowe**

Ujeeddo:-**Ansixinta Xeerka Dalxiiska Puntland**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU: -**

**MARKUU ARKAY: -** Dastuurka Dawladda Puntland Qodobkiisa 64-aad

**MARKUU ARKAY: -** Soo gudbinta Madaxweynaha Ref: MW/DPS /207/2021 ee October, 31, 2021, kuna saabsanaa Ansixinta Xeerka Dalxiiska Puntland.

**MARKUU TIX-GELIYEY: -** Muhiimadda ay leedahay in Xeer lagu Maamulo loo Sameeyo Adeegga Dalxiiska Puntland.

**MARKUU DHEGEYSTEY: -** Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu kalfadhiga 49-aad fadhigiisii 17-aad ee 06.12.2021 cod gacan taag ah **(36)** Mudane ku ansixiyeen Xeerka Dalxiiska Puntland, diidmo iyo aamustoona majirin.

**WUXUU GUDDOOMIYEY: -**

**Ansixinta Xeerka Dalxiiska Puntland.**

**Wada Shaqeyn Wacan**

XAFIISKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADA DAWLADDA PUNTLAND
OFFICE OF THE SPEAKER OF PUNTLAND STATE HOUSE OF REPRESENTATIVES

**Md. Cabdirashiid Yuusuf Jibriil**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

# DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA
# GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND

---

# XEERKA DALXIISKA PUNTLAND

GAROOWE, DECEMBER, 2021

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## TUSMADA XEERKA

**Bogga**


CUTUBKA 1-aad ........ 1
QODOBBO GUUD ........ 1
Qodobka 1-aad ........ 1
Erey Bixin ........ 1
Qodobka 2-aad ........ 1
Magaca Xeerka ........ 1
Qodobka 3-aad ........ 1
Baaxadda Xeerka ........ 1
Qodobka 4-aad ........ 2
Ujeeddooyinka Xeerka ........ 2
Qodobka 5-aad ........ 2
Mabaadi'da Xeerka ........ 2
Qodobka 6-aad ........ 2
Fasiraadda Xeerka ........ 2
Qodobka 7-aad ........ 2
Mas'uuliyadda Wasaaradda ........ 2
CUTUBKA 2-aad ........ 3
WAXYAABAHA KA REEBBAN GOOBAHA DALXIISKA PUTLAND ........ 3
Qodobka 8-aad ........ 3
Waxyaabaha Ka Reebban Goobaha Dalxiiska, ........ 3
Shirkadaha iyo Dalxiisayaasha ........ 3
CUTUBKA 3-aad ........ 3
DIIWAAN-GELINTA SHIRKADAHA DALXIISKA ........ 3
Qodobka 9-aad ........ 3
Bixinta Adeegyada Dalxiis ........ 3
Qodobka 10-aad ........ 3
Noocyada Adeegga Dalxiiska ........ 3
Qodobka 11-aad ........ 4
Shuruudaha Diiwaan-Gelinta Shirkadaha Dalxiiska ........ 4
Qodobka 12-aad ........ 4
Habraaca Diiwaan-Gelinta iyo Bixinta Ruqsadaha Dalxiis ........ 4
Qodobka 13-aad ........ 4
Shuruudaha Hagaha Dalxiisaha ........ 4
Qodobka 14-aad ........ 5
Ruqsad Qaadashada Shirkadaha Dalxiiska iyo Hagaha ........ 5
Qodobka 15-aad ........ 5
Ruqsad Cusboonaysiinta Shirkadaha Dalxiiska iyo Hagaha ........ 5
Qodobka 16-aad ........ 5


GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Kala-noqoshada Ruqsadaha Dalxiiska ........ 5
Qodobka 17-aad ........ 6
Xaqa Cabashada ........ 6
Qodobka 18-aad ........ 6
Waajibaadka Shirkadaha Dalxiiska ........ 6
CUTUBKA 4-aad ........ 6
ISKAASHI ........ 6
Qodobka 19-aad ........ 6
Wada shaqeynta Wasaaradda iyo Hay'adaha kale ........ 6
CUTUBKA 5-aad ........ 7
Ciqaab ........ 7
Qodobka 20-aad ........ 7
Ganaax ........ 7
CUTUBKA 6-aad ........ 7
QODOBBO GUNAANAD AH ........ 7
Qodobka 21-aad ........ 7
Xeer-Nidaamiye ........ 7
Qodobka 22-aad ........ 7
Burin/Laalid ........ 7
Qodobka 23-aad ........ 7
Dhaqan-galka Xeerka ........ 7




GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

# CUTUBKA 1-aad
# QODOBBO GUUD
## Qodobka 1-aad
## Erey Bixin

Xeerkan gudihiisa haddii aan si kale loo fasirin, ereyada soo socda waxaa micnahoodu noqonayaa sidan;-

| Lr | Ereyga | Macnaha |
|---|---|---|
| 1. | Xeer | Waxaa loola jeedaa Xeerka Dalxiiska Puntland. |
| 2. | Dawlad | Waxaa loola jeedaa Dawladda Puntland ee Soomaaliya. |
| 3. | Dastuur | Waxaa loola jeedaa Dastuurka Dawladda Puntland. |
| 4. | Wasaarad | Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Warfaafinta, Isgaarsiinta iyo Dalxiiska Dawladda Puntland. |
| 5. | Ruqsad | Waxaa loola jeedaa Warqadda aqoonsiga diiwaan-gelinta Shirkadaha Dalxiiska. |
| 6. | Dalxiise | Waxaa loola jeedaa dadka dibadda uga baxay degaankooda rasmiga ahaa muddo ka badan 24 saac, ujeedkooduna yahay inay u dalxiisaan meel ka baxsan degaankooda rasmiga ah. |
| 7. | Dhul | Waxaa loola jeedaa dhulka Puntland. |
| 8. | Shirkad | Waxaa loola jeedaa shirkad bixisa adeeg dalxiis oo ruqsad haysata. |
| 9. | Hage | Waxaa loola jeedaa qofka tilmaamaya dalxiisayaasha si uu u baro uguna Fasiro Goobaha Dalxiiska. |

## Qodobka 2-aad
## Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa "Xeerka Dalxiiska Puntland"

## Qodobka 3-aad
## Baaxadda Xeerka

Xeerkan waxaa lagu dhaqayaa dhammaan adeegyada goobaha Dalxiiska ee Puntland.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 4-aad
## Ujeeddooyinka Xeerka

Ujeeddooyinka Xeerka Dalxiiska Puntland waa sidan:-

1. Tayeynta Goobaha Dalxiiska Puntland.
2. Dhiiri-gelinta Maalgashiga Dalxiiska Puntland.
3. Ilaalinta iyo Horumarinta Goobaha Dalxiis ee Puntland.

## Qodobka 5-aad
## Mabaadi'da Xeerka

Xeerkani wuxuu ku dhisan yahay mabaadi'dan soo socota:-

1. Ilaalinta iyo dhawrista deegaanka si waafaqsan qodobka 55-aad ee Dastuurka Dawladda Puntland.
2. Ilaalinta Diinta iyo dhaqanka suuban ee Islaamka si waafaqsan qodobka 9-aad ee Dastuurka Dawladda Puntland.
3. Xoojinta xiriirka saaxiibtinnimo ee Puntland iyo Ajaanibta u soo dalxiis tegaya.

## Qodobka 6-aad
## Fasiraadda Xeerka

Xeerkan waxaa loo fasirayaa si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerarka kale ee Dawladda Puntland.

## Qodobka 7-aad
## Mas'uuliyadda Wasaaradda

1. Maamulka iyo siyaasadda Dalxiiska Puntland waxaa u xilsaaran Wasaaradda, waxayna dejinaysaa arrimahan soo socda:-

   b. Dejinta siyaasadda guud ee lagu hagayo Dalxiiska Puntland, iyadoo sal looga dhigayo shareecada islaamka, Dastuurka iyo Xeerarka kale ee Puntland.
   t. Ilaalinta iyo dayactirka Goobaha dalxiiska.
   j. Samaynta kormeero shaqo si loo hubiyo tayada Dalxiiska Puntland.
   x. Wacyi-gelinta bulshada
   kh. Suuq-geynta iyo xayaysiiska dalxiiska Puntland.
2. Wasaaraddu waxay wada shaqayn iyo iskaashi la yeelanaysaa Wasaaradaha iyo Hay'adaha kale xiriirka la leh dalxiiska.
3. Nidaaminta habka Diiwaan-gelinta iyo Ruqsad-siinta Shirkadaha Dalxiiska, iyadoo saldhig looga dhigayo shuruucda Puntland.
4. Jaan-goynta iyo habaynta goobaha dalxiis ee Puntland.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

# CUTUBKA 2-aad

# WAXYAABAHA KA REEBBAN GOOBAHA DALXIISKA PUTLAND

## Qodobka 8-aad

## Waxyaabaha Ka Reebban Goobaha Dalxiiska, Shirkadaha iyo Dalxiisayaasha

1. Goobaha dalxiiska waxaa ka reebban;

    b. Wax kasta oo ka hor imaanaya shareecada Islaamka, Xeerarka iyo dhaqanka suubban ee Soomaaliyeed.
    t. Ugaarsiga Duur-joogta.
    j. Hubka noocyadiisa kala duwan.
    x. Dhibaataynta iyo waxyeelaynta Goobaha dalxiiska
    kh. Waxyeelaynta Deegaanka.
    d. Keenidda dhammaan xayaawaanaadka u taba-baran ugaarsiga.

2. Dalxiisaha waxaa ka reebban;

    b. Wax kasta oo ka hor imaanaya shareecada Islaamka, Xeerarka iyo dhaqanka suubban ee Soomaaliyeed.
    t. Inaanu ujeeddo ka baxsan dalxiiska aanu galin sida, Macdan-baaris, Ganacsi iyo shaqooyinka kale ee reebban.
    j. Faafinta Sawirrada sumcad xumada ka gudbinaya Puntland.

# CUTUBKA 3-aad

# DIIWAAN-GELINTA SHIRKADAHA DALXIISKA

## Qodobka 9-aad

## Bixinta Adeegyada Dalxiis

1. Adeegyada Dalxiis waxaa bixin kara oo kaliya Shirkadaha Dalxiiska ee wadaniga ah iyo kuwa ajnebiga ah ee ka diiwaan gashan Wasaaradda.
2. Goob dalxiis waxaa furan kara cid kasta oo ruqsad ka haysata Wasaaradda.

## Qodobka 10-aad

## Noocyada Adeegga Dalxiiska

1. Shirkad kasta oo ruqsad ka haysata Wasaaradda waxay bixin kartaa adeegyada dalxiis ee soo socda mid ka mid ah ama dhammaantood:-

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

b. Keenidda iyo maamulidda Dalxiisayaasha.
t. Martigalinta Dalxiisayaasha.
j. Hagidda Dalxiisayaasha.

2. Nooca adeegga dalxiis ee Shirkaddu bixinayso waxaa lagu qeexayaa Ruqsadda diiwaan-gelinta ee Shirkadda la siinayo.

## Qodobka 11-aad

## Shuruudaha Diiwaan-Gelinta Shirkadaha Dalxiiska

Shirkad kasta oo loo diiwaan-gelinayo Adeeg bixinta Dalxiiska waa in ay buuxisaa shuruudahan:-

1. Waa in ay soo gudbisaa codsi qoraal ah.
2. Waa in ay soo gudbisaa xogaha shirkadda iyo Xogta Shaqaalaha Shirkadda oo dhammaystiran.
3. Waa in ay shaqaalaha shirkaddu noqdaan Soomaali marka laga reebo xirfadlayaal looga maarmi waayey shaqada lagana heli karin Puntland.
4. Waa in ay soo gudbisaa diiwaan-gelinta iyo shatiyada dawladaha hoose iyo Wasaaraadda Ganacsiga.
5. Waa in ay ku dhaqantaa xeerarka iyo shuruucda u degsan Dawladda Puntland.

## Qodobka 12-aad

## Habraaca Diiwaan-Gelinta iyo Bixinta Ruqsadaha Dalxiis

1. Shirkad Dalxiis lama furi karo haddii aan laga diiwaan-gelin Wasaaradda.
2. Waxaa shirkadda ruqsadda la siin karaa marka ay buuxiso shuruudaha diiwaan-gelinta ee ku xusan Qodobka 11-aad ee Xeerkan.
3. Shirkad Dalxiis marka ay hesho oggolaanshaha Wasaaradda waa in ay bixisaa lacagta Ruqsad qaadashada, kuna shubtaa Wasaaradda Maaliyadda ee Dawladda Puntland.

## Qodobka 13-aad

## Shuruudaha Hagaha Dalxiisaha

Shuruudaha Hagaha Dalxiisaha waa sidan:-

1. Waa inuu yahay Soomaali.
2. Waa inuu yahay qof sumcad iyo akhlaaq wanaagsan bulshada ku dhex leh.
3. Waa inuu leeyahay aqoon, waayo aragnimo iyo tababar ku saabsan dalxiiska.
4. Waa Inuu aqoon u leeyahay taariikhda dhulka iyo Goobaha Dalxiiska Puntland.
5. Waa inuu ruqsad ka haystaa Wasaaradda.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 14-aad

## Ruqsad Qaadashada Shirkadaha Dalxiiska iyo Hagaha

1. Shirkad kasta oo dalxiis iyo Haguhu waxay ruqsadda u qaadanayaan si sannadle ah.
2. Lacagta Ruqsad qaadashada shirkadda wadaniga ah waa $200 (Labo boqol oo doolar) ama Shillin Soomaali u dhigma.
3. Lacagta Ruqsad qaadashada Shirkadda Ajnebiga ah waa $1000 (Kun doolar) ama Shillin Somaali u dhigma.
4. Lacagta Ruqsad qaadashada Haguha waa $50 (Konton doolar) ama Shilin Soomaali u dhigma.
5. Dhammaan lacagaha Ruqsad qaadashada shirkadaha dalxiiska iyo hagaha, waxaa lagu shubayaa Wasaaradda Maaliyadda.

## Qodobka 15-aad

## Ruqsad Cusboonaysiinta Shirkadaha Dalxiiska iyo Hagaha

1. Shirkad kasta oo dalxiis iyo haguhu waxay ruqsada cusboonaysiinta u qaadanayaan si sannadle ah.
2. Lacagta cusboonaysiinta Ruqsadda ee shirkadda wadaniga ah waa $100 (boqol doolar) ama Shillin Soomaali u dhigma.
3. Lacagta cusboonaysiinta Ruqsadda Shirkadda Ajaaniga ah waa $500 (Shan boqol oo doolar) ama Shillin Soomaali u dhigma.
4. Lacagta cusboonaysiinta Ruqsadda Haguhu waa $25 (Shan iyo labaatan doolar) ama Shillin Soomaali u dhigma.
5. Dhammaan khidmadaha laga qaado cusboonaysiinta raqsadaha shirkadaha dalxiiska iyo hagaha, waxaa lagu shubayaa Wasaaradda Maaliyadda.

## Qodobka 16-aad

## Kala-noqoshada Ruqsadaha Dalxiiska

Si waafaqsan xeerkan, Wasaaraddu waxay kala noqon kartaa Ruqsadda Diiwaan-Gelinta shirkadaha Dalxiiska, haddii ay ku qanacdo in ay jiraan arrimahan hoos ku qoran:-

1. Diiwaan-Gelinta Shirkadda oo ah mid lagu helay sifo baal-marsan xeerkan.
2. Shirkadda oo ah mid faafinaysa dhaqamo iyo caadooyin ka soo horjeeda Shareecada Islaamka iyo Dhaqanka suubban ee Soomaaliyeed.
3. Shirkadda oo jabisa shuruudaha diiwaan-gelinta ee ku xusan Qodobka 11-aad ee xeerkan.
4. Shirkadda oo jabisa waxyaabaha lagu mamnuucay qodobka 8-aad ee Xeerkan.
5. Shirkadda oo ka soo bixi weyda waajibaadka ku xusan qodobka 18-aad ee xeerkan.

6. Hadduu Haguhu buuxin waayo shuruudaha ku xusan qodobka 13-aad.

## Qodobka 17-aad

## Xaqa Cabashada

1. Go'aan kasta oo ay Wasaaraddu gaartay waa in uu fulaa, haddii uusan cabasho la imaan qofka go'aanku ku dhacay.
2. Qofka go'aanku ku dhaco wuxuu xaq u leeyahay inuu cabashadiisa u gudbisto maxkamadda awoodda u leh.
3. Inta maxkamaddu go'aan ka gaarayso cabashada, waxaa shaqeynaya go'aanka Wasaaradda.

## Qodobka 18-aad

## Waajibaadka Shirkadaha Dalxiiska

Shirkadaha Dalxiiska waxaa waajib ku ah arrimahan soo socda:-

1. Ku dhaqanka Xeerkan, Dastuurka iyo Shuruucda kale ee Puntland.
2. Bixinta canshuuraha iyo khidmadaha kale ee ku waajibay si waafaqsan Xeerkan iyo Shuruucda kale ee Puntland.
3. Ilaalinta Deegaanka, duurjoogta iyo goobaha taariikhiga ah ee Puntland.
4. Bixinta adeegyo dalxiis oo tayo leh.

## CUTUBKA 4-aad

## ISKAASHI

## Qodobka 19-aad

## Wada shaqeynta Wasaaradda iyo Hay'adaha kale

1. Wasaaradu waxay wada shaqeyn iyo iskaashi la yeelanaysaa dhammaan wasaaradaha, hay'adaha iyo wakaaladaha ku lugta leh hawlaha dalxiiska, si loo xoojiyo horumarinta iyo habsami u socodsiinta Dalxiiska Puntland.

2. Wasaaradaha iyo Hay'adaha adeegani uu khuseeyo waa in ay wada shaqeyn dhaw la yeeshaan shirkadaha bixiya adeegga dalxiiska.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## CUTUBKA 5-aad

## Ciqaab

### Qodobka 20-aad

### Ganaax

1. Qof kasta oo isticmaala ruqsad dalxiis oo been abuur ah wuxuu muteysanayaa ganaax lacageed oo dhan $500 (Shan boqol oo doolar) ama Shillin Soomaali u dhigma, waxaana lagu ciqaabayaa, ciqaabta ku xusan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.
2. Qof kasta oo ay ku caddaato falalka ku xusan qodobka 8-aad ee xeerkan waxaa lagu ciqaabayaa, si waafaqsan xeerkan iyo xeerka ciqaabta soomaaliyeed.
3. Caadeysiga falalka ku xusan farqadaha 1-aad iyo 2-aad ee qodobkan waxay keeni kartaa luminta iyo kala noqoshada ruqsadaha dalxiis ee caadeystaha.

## CUTUBKA 6-aad

## QODOBBO GUNAANAD AH

### Qodobka 21-aad

### Xeer-Nidaamiye

Wasaaraddu waxay awood u leedahay in ay soo saarto Xeer-nidaamiye, wareegtooyin, hageyaal iyo tilmaamo wax lagu saxayo laguna toosinayo oo aan ka hor imaaneyn xeerkan.

### Qodobka 22-aad

### Burin/Laalid

Waxaa la buriyey xeer kasta oo ka hor imaanaya ama aan la socon Karin xeerkan.

### Qodobka 23-aad

### Dhaqan-galka Xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland Saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee dawladda Puntland.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR